IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho, 25ka Maajo 1988 Lr. 1 R 5

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey waxaa ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee

## K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 13 ee 4 Maajo 1988, Dhismaha Shirkadda Farsamada Doonyaha iyo Qalabka kale ee Caagga ah. Bog; 379

QAYBTA LABAAD

W. M.

QAYBTA SAD/XAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 7.3.87, Naado Dhul J.le Xabiiba Maxamed Siyaad L.255 » 381

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 7.3.87, Naado Dhul J.le Aadan Xaashi Nuur L. 256 » 382

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 7.3.87, Naado Dhul J.le Bashiir Xaashi Nuur L. 257 » 383

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 7.3.87, Naado Dhul J.le Xabiiba Macalin Nuur L. 258 » 384

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 7.3.87, Naado Dhul J.le Maxamuud Xaashi Axmed L. 259 » 385

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 7.3.87, Naado Dhul J.le Felis Cabdi Cali L. 260 » 386

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 12.3.87, Naado Dhul J.le Maxamed C/qaadir Warsame L.261 » 387

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 12.3.87, Naado Dhul J.le Dh. Xaashi Ciid Guuleed L. 262 » 388

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 12.3.87, Naado Dhul J.le Nuur Xaaji Xasan L. 263 » 389

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 12.3.87, Naado Dhul J.le Xasan Cali Maxamed L. 264 » 390

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 12.3.87, Naado Dhul J.le Maryan Muuse Cusmaan L. 265 » 391

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 12.3.87, Naado Dhul J.le Canab Cabdi Maxamuud L. 266 » 392

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 4.5.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cabdiraxmaan Salaad Warsame L. 267 » 393

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 24.5.88, Lumid Jeeg War. L. 0133820 ku qoran Maxamed Faarax Siyaad L. 268 » 394

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 5.4.88, Lumid 10 Jeeg War. ku qoran Maxamed Abuukar X. Cali L. 269 » 395

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 26.4.88, Lumid Jeeg War. L. 0981004 ku qoran Cadeydiid Faarax Xersi L. 270 » 396

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 17.4.88, Lumid Jeeg War. L. 487008 ku qoran Muxyadiin Jeylaani Maxamed L. 271 » 397

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 17.4.88, Lumid Jeeg War. L. 231338 ku qoran Muxyadiin Jeylaani Maxamed L. 272 » 398

MAXKAMADDA G. W. GALBEED, 4.5.88, Lumid Jeeg War. L. 0089082 ku qoran Cabdi Nuur Cali L. 273 » 399

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 8.5.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cabdi Xuseen Khayre L. 274 » 400

MAXKAMADDA G. KISMAAYO, 10.5.88, Lumid 4 Jeeg War. ku qoran Maxamed Sheekh Cabdisalaan L. 275 » 401

MAXKAMADDA G. KISMAAYO, 9.5.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cabdullaahi Ciise Nuur L. 276 » 402

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 8.5.88, Lumid Jeeg War. L. 0021446 ku qoran Maka Cabdullaahi Geedi L. 277 » 403

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 10.5.88, Lumid Jeeg War. L. 0018042 ku qoran Maxamed Cabdi Axmed L. 278 » 404

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 27.4.88, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Cabdullaahi Saciid Xirsi L. 279 » 405

MAXKAMADDA G. SANAAG, 29.12.87, Lumid Jeeg War. L. A092114 ku qoran Maxamed Caamir Cilmi L. 280 » 406

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 10.5.88, Lumid Jeeg War. L. 0488800 ku qoran Saciid Cabdalla Bin Cali L. 281 » 407

# QAYBTA KOWAAD

## SHARCI

Sharci lambar 13 taariikh 4 Maajo 1988: Dhismaha Shirkadda Farsamada Doonyaha iyo Qalabka kale ee Caagga ah.-

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qod. 1aad
### (Dhismaha Shirkadda)

Waxaa la oggolaaday in la dhiso Shirkadda Doonyaha iyo Qalabka kale ee Coogga ah, laguna dhisay heshiiska 14.12.1987 oo ay wada leeyihiin Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo ay Wakiil ka tahay Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda iyo Shirkadaha Sweden ee KMAB iyo SEDFUND.

### Qod. 2aad
### (Saamiga)

Saamiga ka qeyb galka hantida Shirkadda ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya wuxuu noqonayaa 51% (konton iyo kow boqolkiiba), Shirkadaha Swedena waxay yeelanayaan 49% (afartan iyo sagaal boqolkiiba).

### Qod. 3aad
### (Ujeeddooyinka Shirkadda)

Shirkaddu waxay yeelaneysaa ujeeddooyinka soo socda:

1. In ay samayso doonyo iyo qalab kale oo ka samaysan «Glass Fibre Reinforced Polyester»;

2. In ay ka qeyb qaadato horumarinta Xeebaha Soomaaliyeed iyada oo samayn doonta doonyo, waxayna ku iibinaysaa doonyahaas qiimo u dhigma kan doonyahaas oo kale lagaga soo iibsan lahaa dibadda;

3. In ay wax ku kordhiso lacagta adag ee dalka soo gasha iyada oo dhiirigelinaysa iib-geynta dibadda ee qalabkeeda;

4. In ay si dhab u hirgeliso ku wareejinta habka sanco farsamo-yaqaanada Soomaaliyeed;

5. In ay samayso doonyo kala waaweyn si ay u suuragasho in ay Shirkaddu mustaqbalka u noqoto aasaaskii sancada maraakiib samaynta Soomaaliyeed.

Qod. 4aad
(Canshuur Dhaaf)

Waxaa la oggolaaday in Shirkadda laga dhaafo muddo shan sano ah Canshuuraha soo dejinta iyo Canshuuraha dakhliga. Shantaas sano waxay ka bilaabanayaan 1.1.1987.

Qod. 5aad
(Habka Dhismaha Shirkadda)

Dhismaha Shirkadda iyo Maamulkeeda waxaa la waafajinayaa Sharciyada Dalka ka jira ee khuseeya Shirkadaha Saamilayda ah iyo maal-gelinta Shisheeyaha.

Qod. 6aad
(Baabi'in)

Waxaa la baabi'iyay Sharcigii hore ee lambar 8 ee 18.5.1983 ee lagu dhisay Warshadda Doonyaha Caagga ah.

Qod. 7aad
(Dhaqan gal)

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 1.1.1987, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.-

Muqdisho, 4 May 1988

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA SAD/XAAD
TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.
DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Xabiiba Maxamed Siyaad ay soo qoratay Arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Xamar, maaljintii taariikhdu ahayd 3.1.87 ay ku weydiisatay gabal dhul Dawladda ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Qaabkiisu yahay Retangol Addimihii suna yihiin mt. 30X20 kuna fadhiya mq. 600.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lamb. 21

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 24

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 7 Mar. 1987

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH
(J.le Jeom. Aadan Xaashi Nuur)

L. 255

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Aadan Xaashi Nuur uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 12.12.86 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Qaabkiisu yahay Retangol Addimhiisuna yihiin mt. 40X30 kuna fadhiya mq. 1200.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lamb. 7

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 7 Mar. 1987

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH
(J.le Jeom. Aadan Xaashi Nuur)

L. 256

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Bashiir Xaashi Nuur uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 5.1.87 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Qaabkiisu yahay Retangolar Addimi-hiisuna yihiin mt. 40X30 kuna fadhiya mq. 1200.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lamb. 8

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb. 11-9

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 7 Mar. 1987

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH
(J.le Jeom. Aadan Xaashi Nuur)

L. 257

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH

N A A D O   D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Xabiiba Macalin Nuur ay soo qoratay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 10.3.86 ay ku weydiisatay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Qaabkiisu yahay Retangol Addimihii suna yihiin mt. 60X20 kuna fadhiya mq. 1200.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 15-16

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 7 Mar. 1987

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH
(J.le Jeom. Aadan Xaashi Nuur)

L. 258

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH

N A A D O   D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Maxamuud Xaashi Axmed uu soo qortay Arji waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 2.2.87 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Qaabkiisu yahay Retangolar Addimhiisuna yihiin mt. 60X20 kuna fadhiya mq. 1200.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lamb. 12.14

Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 17-18

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 7 Mar. 1987

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH
(J.le Jeom. Aadan Xaashi Nuur)

L. 259

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Felis Cabdi Cali ay soo qoratay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoo-se ee Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 5.1.87 ay ku wey-diisatay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg-mada Cabdulcasiis Qaabkiisu yahay Retangol Addimihiisuna yihiin mt. 30X20 kuna fadhiya mq. 600.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lamb. 19

Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 23

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 22

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 7 Mar. 1987

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH
(J.le Jeom. Aadan Xaashi Nuur)

L. 260

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Maxamed Cabdulqaadir Warsame uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 14.9.87 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Qaabkiisu yahay Retangolar Addimihiisuna yihiin mt. 20X30 kuna fadhiya mq. 600.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 321 W.Biis

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 322 W.

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb. 327 W.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waraana laga doodi karaa muddo 30 soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.-

Muqdisho, 12 Mar. 1987

AGAASIMAHA FAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH

(J.le Jeom. Aadan Xaashi Nuur)

L. 261

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA

**N A A D O   D H U L**

Waxaa la caddeynayaa in J.le Dhax. Xaashi Ciid Guuleed uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 4.2.87 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley Qaabkiisu yahay Retangolar Addimihiisuna yihiin mt. 25X15 kuna fadhiya mq. 375.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Guri dad
Koofur waxaa ka xiga: Guri dad
Galbeed waxaa ka xiga: Guri dad
B a r i waxaa ka xiga: Waddo laami ah

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waraana laga doodi karaa muddo 30 soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.-

Muqdisho, 12 Mar. 1987

AGAASIMAHA FAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH

(J.le Jeom. Aadan Xaashi Nuur)

L. 262

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Nuur Naaji Xasan uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Xa_ mar, maalintii taariikhdu ahayd 25.1.87 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisu yahay Retangolar Addimihiisuna yi_ hiin mt. 25X40 kuna fadhiya mq. 1000.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Guri dad

Koofur waxaa ka xiga: Waddada C.Q.Sida

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Guri dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waraana laga doodi karaa muddo 30 soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.-

Muqdisho, 12 Mar. 1987

AGAASIMAHA FAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH

(J.le Jeom. Aadan Xaashi Nuur)

L. 263

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Xasan Cali Maxamed iyo 3 kale uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/-Hoose ee Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 25.2.87 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley Qaabkiisu yahay Retangolar Addimi-hiisuna yihiin mt. 30X16 kuna fadhiya mq. 480.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Guri dad

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Guri dad

B a r i waxaa ka xiga: Xaaji Cilmi

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waraana laga doodi karaa muddo 30 soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.-

Muqdisho, 12 Mar. 1987

AGAASIMAHA FAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH
(J.le Jeom. Aadan Xaashi Nuur)

L. 264

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Maryan Muuse Cusmaan ay soo qoratay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 3.2.87 ay ku weydiisatay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Qaabkiisu yahay Retangojar Addimihiisuna yihiin mt. 30X20 kuna fadhiya mq. 600.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lamb. 358 W.Biis

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dad

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb. 354 W.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waraana laga doodi karaa muddo 30 soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.-

Muqdisho, 12 Mar. 1987

AGAASIMAHA FAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH

**(J.le Jeom. Aadan Xaashi Nuur)**

L. 265

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Canab Cabdi Maxamuud, Caasha Xasan Cali ay soo qorteen Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 3.2.87 ay ku weydiisteen gabal dhul Dawladeed ah oo ...aal Muqdisho Degmada Wadajir Qaabkiisu yahay Rektangolar Addimihiisuna yihiin mt. 15X35 kuna fadhiya ... 525.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 354 W.Biis
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dad
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb. 358 W.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waraana laga doodi karaa muddo 30 soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.-

Muqdisho, 12 Mar. 1987

AGAASIMAHA FAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH
(J.le Jeom. Aadan Xaashi Nuur)

L. 266

MAXKAMADDA G. TOGDHEER BURCO

MGT/138/88 Burco, 4.5.1988

UJ: Baafin Jeegagga Wareega ee Lr. 1) 0092683 2) 0092684

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin Jeegagga Wareega ee lumay ee uu keenay Cabdiraxmaan Salaad Warsame;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco, tr. 3.5.88;
HADDUU ARKAY: Qod. 69, D.L. ee Sharci Lr. 2 ee 9.9.1965.

WUXUU XEERAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee kor ku xusan ee laga sameeyey Laanta Burco tr. 18.4.88 kuna qoran Cabdiraxmaan Salaad Warsame kana lumeen isla isaga.

WUXUU AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco in ay siiso J.le Cabdiraxmaan Salaad Warsame Lacagta dhan Sh.So. 500,000 ee ku kala qoran Jeegagga Wareega ee kala ah:- 1) 0092683 Sh.So. 200,000 2) 0092684 ee Sh.So. 300,000 J.le Cabdiraxmaan Salaad Warsame oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku xusan, ka dib markii ay ka soo wareegto muddo 20 casho laga bilaabo maalinta go'aanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. haddii aan intaa la keenin wax ishortaag ah.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco
(Cabdillaahi Xasan Maxamed)

Kaaliyaha Max. G. Tog. Burco
(Jaamac Cabdillaahi Bile)

L. 267

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cali Maxamuud Guuleed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. 0133820 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna qoran lacag dhan Sh.So. 268.638, kuna qoran magaca Maxamed Faarax Siyaad sida ku cad warqadda lam. 4842 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0133820 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran tahay Sh.So. 268.638 kuna qoran magaca Maxamed Faarax Siyaad.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cali Maxamuud Guuleed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 268.638 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 24.5.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 268

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxaxamed Abuukar X. Cali;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 10 Jeeg War. ee hoos ku qoran, laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha 1aad iyo Xarunta kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 337.700 kuna qoran magaca J.le Maxamed Abuukar X. Cali sida ku cad warqadda lamb. 000526 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha 1aad iyo Xarunta;

| J.W.No. | Taariikh. | Sh.So. | Magaca | Laamaha |
|---|---|---|---|---|
| 0695451 | 5.4.88 | 50.000 | Cumar Cabdulle Cali | 1aad |
| 0695452 | 5.4.88 | 50.000 | Sacuuda Cabdulle Cali | 1aad |
| 0688058 | 5.4.88 | 50.000 | Madiina Xaaji Yaaqow | Xarunta |
| 0688059 | 5.4.88 | 50.000 | Maryan Xasan Nuur | Xarunta |
| 0688032 | 5.4.88 | 50.000 | C/raxmaan Abuukar X.Cali | Xa. |
| 0070770 | 5.4.88 | 17.550 | Cumar Cabdulle Cali | Xarunta |
| 0070785 | 5.4.88 | 17.550 | Maryan Xasan Nuur | Xarunta |
| 0070771 | 5.4.88 | 17.550 | Sacuuda Cabdulle Cali | Xarunta |
| 0070772 | 5.4.88 | 17.550 | C/raxmaan Abukar X.Cali | Xar. |
| 0070784 | 5.4.88 | 17.500 | Madiina Abukar X.Yaaqow | Xar. |

HADDUU ARKAY: Qod 69 sharciga lr 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran, laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha 1aad iyo Xarunta kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 337.700.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha 1aad iyo Xarunta in ay siiyaan J.le Maxamed Abuukar X. Cali lacagta cadadeedu tahay Sh.So 337.700 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 5.4.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 269

MAXKAMADA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cadeydiid Faarax Xersi;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. 0981004 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100.000 kuna qoran magaca Caydiid Faarax Xirsi sida ku cad warqadda Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0981004 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Cadeydiid Faarax Xirsi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir in ay siiso Cadeydiid Faarax Xirsi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. Lr. 0981004 kor ku qoran, markay ka soo wareegot muddo aan ka yareyn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii intaa wax ishortaag ah aan ka imaan.

Muqdisho, 26.4.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 270

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Muxiyadiin Jeylaani Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. 437008 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boosaaso kuna jirto lacag dhan Sh. So. 10.000 kuna qoran magaca J.le Geedi Aadan Sugule sida ku cad warqadda lam. 3613 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 487008 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Boosaaso kuna jirto lacag dhan Sh.So. 10.000 kuna qoran magaca J.le Geedi Aadan Sugule.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boosaaso in ay siiso J.le Muxiyadiin Jeylaani Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 10.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.4.1988

(GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 271

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Muxiyadiin Jeylaani Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. 231338 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qoryooley kuna jirto lacag dhan Sh. So. 20.000 kuna qoran magaca J.le Saciid Nuur Maxamed sida ku cad warqadda lam. 3613 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 231338 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Qoryoolay kuna jirto lacag dhan Sh.So. 20.000 kuna qoran magaca J.le Saciid Nuur Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qoryoolay in ay siiso J.le Muxiyadiin Jeylaani Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 20.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.4.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 272

MAXKAMADDA G. W. GALBEED HARGEYSA

MGH/24/88 Hargeysa 4.5.88

UJ:- Degreeto Cusboonaysiin Jeegga Wareega ee lumay lambar yahay 0089082 ee 2.5.88 Sh.So. 160.000 ku qornaa Cabdi Nuur Cali laga sameeyey Laanta 1aad ee Hargeysa.

K/S. Guddoomiyaha Maxkamadda G. W. Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga ah codsiga ee uu soo qortay ninka la yiraa Cabdi Nuur Cali ee uu ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee lumay ee kor ku xusan;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa ee 3.5.88 ee uu Bangigu u kala diray Laamihiisa iyo Xisaabaha Guud;

MARKUU ARKAY: Xaashida Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa ee uu Bangigu ku soo caddeeyey in Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusani uu iska leeyahay astaamaha Ujeedada ku xusan;

MARKUU ARKAY: In Lacagta Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan uu iska leeyahay ninka la yiraa Cabdi Nuur Cali;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan la kansal gareeyo, loona cusboonaysiiyo ninka la yiraa Cabdi Nuur Cali, cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood buuxda ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib marka la faafiyo.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa in uu Nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga irdihiisa si ciddii haysata Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

K/S. Guddoomiyaha Maxkamadda G. W. Galbeed Hargeysa

(Maxamed Yuusuf Caynaan)

Kaaliyaha Max. G.W.Galbeed Hargeysa

(Axmed Wacays Maxamed)

L. 273

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

**HADDUU ARKAY**: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdi Xuseen Kheyre;

**HADDUU TIXGELIYEY**: In ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 0678035-0678034 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Berbera kuna kala jirto min Sh. So. 50.000, guud ahaan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Cabdi Xuseen Kheyre sida ku cad warqadda lam. 4365 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

**HADDUU ARKAY**: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.1966.

**WUXUU XEERIYEY**

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 0678035-0678034 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Berbera kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Cabdi Xuseen Kheyre.

**WAXAA LA AMRAYAA**

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Berbera in ay siiso J.le Cabdi Xuseen Kheyre lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 8.5.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 274

## MAXKAMADDA DEGMADA KISMAAYO

Go'aan 4/88 — Kismaayo, 10.5.1988

UJEEDDO:- Dib u cusboonaysiin Jeegag lumay (Ammortamento).

Garsooraha Hawlaha Deg-Degga ah ee Maxkamadda GJH

HADDUU ARKAY: Arjiga taariikh. 9.5.88 ee uu soo qortay J.le Maxamed Sheekh Cabdisalaan ee uu ku codsanayey in loo cusboonaysiiyo Jeegagga looga xaday Ceel Gaab kana tirsan Muqdishow, Jeegaggaasi oo ka baxay Bangiga Ganacsiga L/Kismaayo oo kala ah:- 1) J.W. 1082307 ee taariikh. 5.5.88 kuna qoran tahay 100.000 Sh. 2) J.W. 1082308 ee 5.5.88 kuna qoran tahay 100.000 Sh. 3) J.W. 1082309 kuna qoran tahay 100.000 Sh. 4) J.W. 1082310 ee 5.5.88 kuna qoran tahay 100.000 Sh. dhammaantoodna uu ku qoran yahay Maxamed Sheekh Cabdisalaan;

HADDUU ARKAY: Inay tahay shaqadiisa inuu soo Ammortamenteeyo Jeegaggaas sare ku cad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Xeer lambar 2 ee 9.9.1965 (ALLEGATO B).

### WUXUU XEERIYEY

Isagoo Tixgelinaaya Qodobka sare ku xusan in loo cusbooneysiiyo J.le Maxamed Sheekh Cabdisalaan Jeegagga Wareega ee kala ah:-

1. 1082307 ee 5.5.88 — kuna qoran tahay 100.000 Sh.
2. 1082308 ee 5.5.88 — kuna qoran tahay 100.000 Sh.
3. 1082309 ee 5.5.88 — kuna qoran tahay 100.000 Sh.
4. 1082310 ee 5.5.88 — kuna qoran tahay 100.000 Sh. dhammaan ku qoran magaciisa ka dib markii lagu qoro Faafinta Rasmiga ee JDS, 15 (casho) ka dib, laguna wareejiyo naftiisa ama cid ka sidata Wakaalad rasmi ah.

Garsooraha Hawlaha Deg-Degga ah ee Maxkamadda GJH
(Sheekh Qaasim Abiikar)

L 275

MAXKAMADDA DEGMADA KISMAAYO

Tirsi:_ Go'aan 3/88 Kismaayo, 9.5.88

UJEEDDO:_ GO'AAN (AMMORTAMENTO

Garsooraha Maxkamadaha Deg_Degga ah G.J.Hoose

HADDUU ARKAY: Arjiga codsiga ee uu soo qortay J.le Cabdullaahi Ciise Nuur, kaasoo laga xaday Jeegaggu Wareega oo laba ah oo yaalay Bakhaar la jabsaday;

HADDUU ARKAY: Warbixinta Saldhigga Booliska Kismaayo ka soo baxday ee la xariirta xadista Jeegaggaas ee lamb. SBK/BD, 2307/88 ee taariikh, 9.5.88 iyo warbixinta Bangiga 0539;

HADDUU ARKAY: Inay tahay shaqadiisa soo saaridda Ammortamentada Jeegagga kala ah:_ 1) 1032107 kuna qoran tahay 100.000 Sh. Boqolkun, 2) 0309035 ayna ku qoran tahay 50.000 Sh. Kontonkun kuna qoran magaca Cabdullaahi Ciise Nuur, kuwaasoo la qoray 27.4.88 Bangiga Ganacsiga L/Kismaayo.

WUXUU XEERIYEY

Isagoo Tixgelinaaya Qodobka 69 - XL. 2 ee 9.9.65 in loo cusboonaysiiyo J.le Cabdullaahi Ciise Nuur labada Jeeg ee la xaday kala ah:_ 1) J.W. 1032107 ku qoran tahay 100.000 Shilin, 2) J.W. 0309035 kuna qoran tahay 50.000 Sh. 15 (gudahood ka dib marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah, lagu wareejiyo isaga ama qof ka ah Wakiil.

Garsooraha Maxkamadaha Deg_Degga ah G.J.Hoose
(Sheekh Qaasim Abiikar)

L. 276

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Maka Cabdul laahi Geeddi

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 0021464 Laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaali yeed kuna jirto lacag dhan sh.so. 67.500 kuna qoran ma gaca J/le Maka Cabdullaahi Geeddi sida ku cad warqadda Lam. 2540 Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega Wareega Lambar 0021464 Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan sh.so. 67.500 kuna qoran magaca J/le Maka Cabdullahi Geeddi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed in ay siiso J/le Maka Cabdullaahi Geeddi Lacagta Cadeyntu tahay sh.so. 67.500 oo ah bedelkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii Inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 8.5.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 277

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

**HADDUU ARKAY**: Arjiga uu soo qortay J/le Maxamed Cab di Axmed.

**HADDUU TIXGELIYEY**: In uu Lumay J/War. Lr. 0018042 Laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaali yeed L/Koowaad kuna jirto lacag dhan sh.so. 10.000 ku na qoran magaca J/le Maxamed Cabdi Axmed sida ku cad warqadda lam. 4378 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Q.X. Guud.

**HADDUU ARKAY**: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

**WUXUU XEERIYAY**

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega Wareega Lambar 0018042 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Kow. kuna jirto lacag dhan sh.so. 10.000 kuna qoran magaca J/le Maxamed Cabdi Axmed.

**WAXAA LA AMRAYAA**

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Kowaad In ay siiso J/le Maxamed Cabdi Axmed lacagta cadeyntu ta hay sh.so. 10.000 oo ah bedelkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bil aabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 10.5.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 278

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdullaahi Saciid Xirsi;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 3 Jeeg War. lam. 0691646-0691647-0691648 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad kuna kala jirto lacag dhan min Sh.So. 50.000 guud ahaan Sh.So. 150.000 kuna qoran magaca Cabdullaahi Saciid Xirsi, sida ku cad warqadda lam. 332 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 0691646-0691647-0691648 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 150.000 kuna qoran magaca Cabdullaahi Saciid Xirsi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad in ay siiso Cabdullaahi Saciid Xirsi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 150.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.4.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 279

MAXKAMADDA GOBOLKA SANAAG

MGS/L.430/87 Ceerigaabo, 29.12.87

UJEEDDO: BEDELAAD JEEG-WAREEGA LAM. A0902114

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Sanaag

HADDUU ARKAY: Codsiga taariikhdiisu tahay 28.12.87, ee uu Maxkamadaan u soo qortay J.le Cabdi Maxamed Xasan, isagoo ka codsaday Maxkamadaan in loo baaliyo Jeeg ka lumay;

HADDUU ARKAY: Waxa uu ku saabsan yahay codsigaasi;

HADDUU ARKAY: Ogeysiiska Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Baran, sida ku cad warqadda Sum. 000282 ee 25.11.87, taasoo ay ku cadahay inuu lumay Jeegga Wareega Lam. A0902114, kuna qoreyd Lacag dhan (100.000) Shilin iyo Magaca Maxamed Caamir Cilmi, Lacagta ku qorayd Jeegga lumayna uu iska lahaa J.le Cabdi Maxamed Xasan, iyadoo laga baafiyey Jeeggaas B.G.&K.S. Laanta Baran;

HADDUU ARKAY: Qod. 69, D.L. 9.9.65. N/2, lumid Jeeg Wareega Lam. A0902114 kuna qoran tahay Lacag dhan (100.000) Shilin keliya.

WUXUU AMRAYAA

In la cusboonaysiiyo Jeegga War. lam. A0902114 ka dib markii ay ka soo wareegto muddo dhan (30) Beri marka go'aanka lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro J.le Cabdi Maxamed Xasan ama qof isaga ka sita Wakaalad Sharci ah, iyadoo la sugayo mudada kor ku xusan.

Guddoomiyaha Max. G. Sanaag Ceerigaabo
(Dr. Cabdiraxmaan Sh. Maxamed)

L. 280

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Saciid Cabdalla;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. 0488800 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baardheere kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Saciid Cabdalla Bin Cali sida ku cad warqadda lam. 4379 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0488800 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Baardheere kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Saciid Cabdalla Bin Cabdalla.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Baardheere in ay siiso J.le Saciid Cabdalla Bin Cabdalla lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.5.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 281